

Ihre Rechte zählen – EU Survey of Immigrants and Descendants of Immigrants



Somali - Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo

Muxuu xog aruurintaan ku saabsanyahay?

Xog aruurintaan wuxuu ururinayaa macluumaad ku saabsan khibradaha iyo fikradaha dadka asalkoodu yahay dhaladka ama soogalooti ka yimid Turkiga, Saxaraha Afrika iyo Suuriya. Waxaan xiiseyneynaa khibradahaaga maalinlaha ah ee qaybaha kala duwan ee nololaha sida shaqada, caafimaadka iyo guriyeynta, iyo haddii aad dareentay midab takoor ama si caddaalad ah laguula dhaqmay. Xog aruurintaan waxaa laga sameeyay 15 dal oo Yurub ah.

Yaa fulinaya xog aruurintaan?

Daraasaddaan waxaa fulinaysa Statistik Austria iyadoo wakiil ka ah Hay'adda Midowga Yurub ee Xuquuqda Aasaasiga ah.

Waa maxay Hay'adda Xuquuqda Aasaasiga ah (FRA)?

Wakaaladda Midowga Yurub ee Xuquuqda Aasaasiga ah (FRA) waxay xarunteedu tahay Vienna, Austria. Hay'addu waxay ka caawisaa hay'adaha Midowga Yurub iyo Dowladaha xubnaha ka ah Midowga Yurub sidii loo hubin lahaa in la ixtiraamo xuquuqda dadka oo dhan. Xog aruuradii hore ee wakaaladdu waxay gacan ka gaysatay hagaajinta xaaladda dadka kala duwan sida soogalootiga, carruurta, dhibbanayaasha rabshadaha iyo Roma. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo <http://fra.europa.eu/>

Maxay xog aruurintu muhiim u tahay?

Macluumaad yar ayaa laga heli karaa sida dadka ka soo jeeda qowmiyadaha tirada yar iyo bulshooyinka soogalootiga ah ay ugu dhaqmaan xuquuqdooda iyo haddii ay u maleynayaan in xuquuqdooda la ixtiraamo. Natiijooyinka xog aruurinta waxay ka caawin doonaan kuwa siyaasad dejiyayaasha ah inay ogaadaan arrimaha ugu deg degsan ee wax laga qabanayo, si loo hubiyo in si isku mid ah loola dhaqmo dadka oo dhan.

Yaa ka qeybqaadan kara?

Waxaan jeclaan lahayn inaan wareysi la yeelano dadka ku nool Awstaria ee asal ahaan ka soo jeeda Turkiga, Suuriya ama Saxaraha ka hooseeya Afrika oo leh ugu yaraan hal waalid oo ku dhashay waddamadaan/gobolladaan. Waxaan kuu dooranay si aan kala sooc lahayn oo aan lagu badali karo qof kale, sababtoo ah taasi waxay u janjeedhaysaa natiijooyinka.

Goorma ayaan ka qayb qaadan karaa?

Markaad hesho warqad uu ku qoran yahay koodhka aad ku geli karto, waxaad booqan kartaa www.statistik.at/onlinebefragung si aad u furto xog aruurinta. Fadlan ka jawaab su'aalaha isla markiiba kahor inta aan la gaarin waqtiga kama danbeysta ah ee lagu qoray casuumada.

Goorma ayaa natiijooyinka la daabici doonaa?

Natiijooyinka ugu horreeya ee xog aruurintaan waxaa la daabici doonaa dhammaadka sannadka 2022 waxaana laga heli doonaa websaydhka FRA: <http://fra.europa.eu/en>.

Sidee u helaa boonadayda?

Marka aad dhameysto xog aruurinta, waxaan boosto kuugu soo diri doonaa boonadaada €10 ka doolar.

Sidee u buuxiyaa xog aruurinta?

Koodhka lagu galo barta si loo buuxiyo xog aruurinta waxaa lagu daabacay warqada aad heshay ee ku saabsan xog aruurinta. Fadlan booqo www.statistik.at/onlinebefragung kadibna boqshada soo baxaysa geli koodhka.

Ma qaadan karaa nasasho qayb ahaan inta aan ku dhammaystirayo xog aruurinta khadka tooska ah?

Haa, markaad dhammeystireyso xog aruurinta khadka tooska ah jawaabahaaga ayaa si ootomaatig ah loo keydiyaa su'aal kasta kadib. Waad ku xidhi kartaa daaqada biraawsarka foomka su'aalaha markasta oo aad jeceshahay - jawaabahaaga ayaa la keydin doonaa.

Goorma ayaan u baahanahay inaan ku dhammaystiro xog aruurinta?

Fadlan soo buuxi xog aruurinta sida ugu dhaqsaha badan, jyo dhacdo kasta kahor waqtiga kama danbeysta ah ee lagu qoray casuumaada.

Muddo intee le'eg ayay qaadan doontaa in la dhammaystiro xog aruurinta?

Xog aruurintu waa inay qaadataa illaa 45 daqiiqo in la dhammaystiro. Aqoon gaar ah looma baahna.

Ma laigu aqoonsan karaa natiijooyinka?

Maya. Jawaabahaaga waxaa lagu dari doonaa kuwa dadka kale ee kaqaybqaata xog aruurinta waxaana loo isticmaali doonaa oo keliya xog aan la aqoon. Jawaabaha kooxaha jawaabeyaasha oo cabbirkoodu yar yahay si ay awood ugu yeeshaan shakhsiyaadka in la aqoonsado, si gooni ah looma daabici doono. Jawaabahaaga maheli karaan kuwa sharci fulinta, canshuuraha ama laanta socdaalka

Yaa heli kara macluumaadkeyga?

Xogta meelaha lagaala xariiro iyo jawaabahaaga xog aruurinta waxaa aruurin doona Statistics Austria. Kadib marka la tirtiro xogtaada meelaha lagaala xariiro ee FRA, ee soo diyaarisay daraasada, hesho xogtaada qarsoodiga ah.

Bayaanka xaqiijinta Ilaalinta xogta

https://www.statistik.at/wcm/idc/idcplg?IdcService=GET_PDF_FILE&dDocName=127419

Su'aalo dheeraad ah

Soo wac ama iimayl usoo dir haddii aad u baahan tahay caawimaad.

Taleefanka: (01) 71128 8993 (Isniinta illaa Jimcaha 9:00- 15:00)

Iimayl: miteinander@statistik.gv.at